

Tilmaamaha jirka ku wada dhaqidda ee lagu sameynaayo Hibiscrub® 40 mg/ml (laba jeer ku qubeysiga)

Waxa muhiim ah in markasta oo la qubeysanaayo la wada gaadhsiiyo dhamaan maqaarka. Raac tilmaamaha ku qubeysiga ee shaqaalaha daryeelka. Caawimo weydiiso haddii aanad meel kasta adigu wada gaadhi kareynin.

1

Iska saar saacada, fargalka iyo dahabka kale. Jidhka oo dhan wada qoy kadibna xidh biyaha.



2

Qaado HiBiScrub oo ku dhaq timaha. Iska ilaali inay saabuuntu indhaha iyo dhagaha kaa gasho.



3

Gacanta ama burush cusub oo qoyan ku qaado HiBiScrub, iyadoo aad jidhka oo dhan si taxadir leh ugu wada marinayso. Xagga sare ka soo bilow oo hoos u soo wad.



Si taxadir leh ugu maydh meelahan:

- Sanka iyo afka agtiisa
- Kilaan kilooyinka
- Xudunta
- Xubnaha taranka iyo gumaarka

4

Iska wada rog/maydh dhamaan saabuunta.



5

Ku soo celi talaabooyinka/qodobada 2-4. Waxa aad hadda sameysay waxa loo yaqaan laba jeer ku qubeysiga.



6

Isku qalaji tuwaal nadiif ah. Xagga sare ka soo bilow oo hoos u soo wad. Qaado dhar nadiif ah iyadoo aad sariirtana go'yaasha ka badalayso.



Vnr. 59 23 78

Vnr. 59 60 23

Maadada shaqeyneysa: Klorhexidin.

Nooca daawada: Dareere infegshanka maqaarka loogu talo galay 40 mg/ml (jaale khafiif ah).

Waxay ka kooban tahay: Maadada shaqeyneysa; Klorhexidin digulonat 40 mg/ml. Poloxamer, lauryldimetylaminoxid, isopropylalkohol, d-glukonolaktol, glycerol, makrogolglycerolkokoat, biyo la nadiifiyey.

Habka daawadu u shaqeynayso: HiBiScrub waa dilaaga jeermiska oo lagu nadiifiyo maqaarka, kaas oo micnaahiisu yahay inuu dilaayo ama hakinaayo koritaanka noocyo badan oo bakteeriyada ah iyo fangaska iyadoo sidaas darteedna uu ka qeyb qaadanaayo inuu ka hor taggo infegshanka nabarada.

Meelaha lagu isticmaalaayo: Waxa HiBiScrub lagu isticmaala si maqaarka jeermiska loogu dillo oo sidaas darteed looga hortago infegshanka nabarada iyadoo marka lagu soo celceliyo dhaqista la helaayo saameyn ka dheer.

Digniin: Waxa HiBiScrub kaliya loogu talo galay jidhka guudkiisa iyadoo lagu isticmaalo maqaarka. Waa in la iska ilaaliyo inay saabuuntu indhaha iyo dhagaha kaa gasho – wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg warqada dhalada daawada ku taala.

Dawska/Qiyaasta: Timaha ku dhaq qiyaas ahaan 10ml Hibiscrub

Jidhka intiisa kale ku dhaq qiyaas ahaan 15ml Hibiscrub, ka itaali inay indhaha iyo kanaalka dhegaha kaa gasho.

Iyadoo ku xidhan hadba baaxada jidhka iyo timahu intay leegyihin, ayaa baahida saabuunta Hibiscrub ay kala duduwanaa kartaa dadka kala duduwan. Waxaan kuu soo jeedinaynaa inaad isticmaasho ugu yaraan 25 ml iskugeyn ahaan markii kasta ee timaha lagu dhaqaayo taas oo ka danbeysa dhaqista jirka (50 ml labadii duub).

Wax dheeraad ah ka akhri www.molnlycke.se

Mölnlycke Health Care AB, Box 13080, 402 52 Göteborg Tel: 031-722 30 00. E-mayl: info.se@molnlycke.com

Magaca Mölnlycke Health Care iyo sumadda iyo HiBiScrub waxay ka diiwaan gashan yihiin aduunka iyadoo ay leeyihiin mid ka mid shirkadaha ka tirsan kooxda Mölnlycke Health Care. Copyright (2016)


Mölnlycke®